



Ardayda Franklin oo Sen. Ron Wyden su'aalo ku weydiiyay kulanka dhageysiga

Sen. Ron Wyden wuxuu rabay in uu su'aalo ka dhageysto ardayda, wuxuuna toddobaadkii la soo dhaafay tegay meesha saxda ah markii uu kulan ku qabtay goobta wax lugu soo bandhigo ee Dugsiga Sare ee Franklin.

Wyden, oo Oregon ku matalayay Cogress-ka tan iyo 1980 iyo Senate-ka oo uu ku matalayay tan iyo 1996-kii, ayaa Maalintii Khamiista joogay Franklin iyada oo ay qayb ka ahayd Dhageysiisa taxanaha ah ee Mustaqbalka kaasi oo uu ku soo wareegay Oregon si uu su'aalo uga qaato ardayda. Ardayda Franklin waxay su'aalo ka weydiiyeen arrimo badan oo kale duwan.

11 su'aalood oo ardayda Franklin weydiisay waxay ku bilaabmeen mid ka saabsanayd sida natiijooyinka ka soo baxa doorashooyinka muddada dhexe ‘midterm elections’ ay saameyn ugu yeelanayaan sida ay Congress-ku ula xisaabtami karaan Madaxweyne Trump, iyo sida Senate-ka ay u saameyn doonto.

Ardaydu waxay sidoo kale weydiiyeen waxyaabo ku saabsan sharciyada dhanka socdaalka ee isbeddelaya; dowladaha shisheeye ee jebinaya/afduubaya ‘hacking’ doorashooyinka Maraykanka; in sharciyada dhanka hubka ama maalgelinta caafimaadka dhimirku ay aad muhiim ugu ahayd wax ka qabashada rabshada; waxyaabo ku saabsan deegaanka; iyo waxyaabo ku saabsan dhawaqa dhanka doodda ee ka jira Washington.

“Aragtidayda aasaasiga ah waa, marka ay noqoto siyaasada, marka qof uu hoos isku dhigo, waxaan dadka u sheegaa, waan in aanu coddeynaa,” ayuu sheegay.

Ka dib markii ay dhacdadii rasmiga ahayd dhammaatay, kooxo badan oo arday ah ayaa sii joogay, isaga oo Wyden uu dhowr su'aalood oo dheeraad ku qaataj meel aan rasmi ahayn, iyada oo ay su'aaluuhu sii noqonayeen kuwo aan caadi ahayn, oo ay ku jiraan wadahadal ku saabsan habka doorashada ee Electoral College.

“Ma jirin wax su'aal xun oo maanta ka jirtay guriga,” ayuu sheegay. “Si wanaagsan ayaad isku diyaariseen.”

[Fiiri sawirro buuxa oo ka socda dhacdada](#)